

# Fursada kuleejka iyo xirfada shaqo ayaa adiga halkaan kuugu diyaar ah.

## Waxaa jira barnaamij kulleej ama tababar ah oo adiga diyaar kuu ah.

Meel kasta oo aad ka joogto noloshaada, waxaa jira barnaamij kaa caawin kara buuxinta baahiyahaaga. Baahidaas waxay noqon kartaa shahaado shaqo, shahaado/digrii labo sano ah, tababar shaqo, shahaadada koowaad, ama shahaadooyin kale.

## Kuleej iyo tababbar ayaa halkan kuugu diyaar ah - haddii Aad dib u bilaabeysid ama haddii Aad hadda uun bilaabeysidba.

Ma ogeyd in ka badan kala bar ardayda jaamacadda iyo afar meelood meel ka mid ah ardayda jaamacadda dadweynaha ee Oregon inay ka weyn yihiin da'da 25? Marna ma jirto wax la dhaho waan ka daahay kasbashada digrii ama shahaado, ama inaad dhamaysato barnaamij tababar ah! Waxaa laga yaabaa inaad bilowday, laakiin aadan dhamayn. Waxaa laga yaabaa inaad tixgelisay inaad codsato, laakiin aad ku fakartay in adiga aan laguugu talagelin. Waddo kasta oo aad qaado, waaad haysataa xulashooyin.



Keliya naftayda uma cadeynayo inaan dhameyn karo shahaadadeyda digriiga lakiin sidoo kale waxaan u cadeynaya caruurteyda. Waxaan rabaa inaan arrintaan ku guuleysto iyaga drtooda si ay u ogadaan in had iyo jeer laga sii wadan karo wax walba meeshii lagu joojiyo lana samaysan karo noolasha aad rabto.



Waxaan ka shaqeynayaa habka aan ku heli lahaa tababark shaqo sababta oo ah waxaan rabaa inaan kasbado mushahar fiican si aan u biilo reerkayga, iyo inaan sidaas ku sameeyo shaqo aan jeclahay.

## Digrii ama shahaado ayaa sare u qaadi kara shaqadaada iyo dakhligaaga.

Kuleejka saxda ah ama barnaamijka tababarka ee saxda ah ayaa kaa caawin kara inaad hesho shaqo mushahar fiican lagu qaato, inaad hormar ka samayso shaqadaada hadda, ama inaad bilowdo shaqo cusub.

## Kuleejka iyo tababbarku waxay la jaan qaadi karaan noloshaada iyo jadwalkaaga.

Miyaad shaqeynsaa waqtibuu? Miyaad kala dooran la'adahay iskuulka iyo xarunta daryeelka carruurta? Waajibaad qoys miyaa ku saaran? Kuleejyada bulshada iyo jaamacadaha Oregon waxay bixiyaan koorsooyin onlayn ah, waxay goobo waxbarasho ku leeyihiin gobolka oo dhan, waxayna bixiyaan barnaamijyo waqtidhiman ama waqtibuu ah oo daboola baahiyahaaga.

## **Ma jirto hal wado oo keliya oo aad ku noqon karto arday kuleej. Raadi wadada adiga kugu haboon.**

Shaqaalaha kuleejku waxay kaa caawin karaan inaad doorato barnaamijka kuugu fiican, inaad hesho xulashooyinka kaalmada maaliyadeed, inaad ogaato sida buundooyinkii hore loo soo wareejin karo, oo inaad dhamaysato digriigaaga ama shahaadadaada.



Markii labaad ee ku laabtay kuleejka, waxaan dareemay inaan diyaar ahay. Hadda ayaan ahay qof ujeedkiisu cad yahay. Wuxaan gudbiyey codsiga kaalmada maaliyadeed waqtigii loogu talagalay oo runti waxaan helay xoogaa caawimaad ah. Markaan halkaa gaadhadyna, la kulanka ardayda in badan aniga oo kale ah, oo ka shaqeeynaya digriiyada dhinacyo badan oo aan weligay xitaa ku fikirin, sida sayniska kombuyutarka iyo caafimaadka dadweynaha, ayaa i dareensiisay inaan ogaado inaan haysto fursado badan. Hadday awoodaan, anigana waan awoodaa!



Dugsiga sare wuu igu adkaa aniga. Marna kuma aanan fikirin kuleejka oo qorshaha iiguma jirin. Laakiin markii aan ugu dambayntii iska diiwaangeliyay fasal, waxaan noqday qof gacantiisa kor u taaga, kana jawaaba su'aalah. Marnaba horay uma aan ogeyn waxa aan awood u leeyahay inaan sameeyo!

## **Caawimaadda maaliyadeed waxay waxbarashadaada iyo tababbarkaaga ka dhigi kartaa mid aad awoodi karto inaad iska bixiso.**

Deeqaha waxbarasho iyo deeqo kale ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyaan inaad iska bixin karto lacagaha waxbarashada, buugaagta, iyo kharashyada kale.

Sannad kasta, Gobolka Oregon wuxuu abaalmarin ka badan \$100 milyan oo deeqo ah siiyaa ardayda wuxuuna maamulaa in ka badan 600 deeqo waxbarasho ah oo gaar ah.

- Buuxi Arjigaaga Kaalmada Federaalka ee loogu talagalay Ardayda (FAFSA) ama Arjiga Kaalmada Ardayga ee Oregon (ORSAA).
- Raadi oo codso deeqaha gobolka iyo deeqaha waxbarasho ee aad u-qalanto adigoo booqanaya OregonStudentAid.gov.
- La hadal xafiiska kaalmada maaliyadeed ee dugsiga ama barnaamijka aad xiiseyneyo.

**La hadal la-taliye ama booqo  
[oregon.gov/highered](http://oregon.gov/highered) si aad wax  
badan uga ogaato xulashooyinkaaga.**